




Xiriirka Waalidka (Parent Portal Signing): Saxiixa Foomka Qaybinta ee Kombuyuutarka (Chromebook-ga) oo leh Saxiixa Elektarooniga ah (E-Signature)

Taariikhda: 31-ka Agoosto, 2020

Dugsiyada Magaalada Columbus ayaa cusboonaysiiyay hanaanka loogu tala galay ardayda helaya Kombuyuutarada (Chromebook-yada) degmada. Markii hore, waalidiinta waxay ahayd inay si rasmi ah u saxiixaan Foomka Qaybinta Kombuyuutarka (Chromebook-ga) iyagoo qiraya inay garanayaan waajibaadka ku xusan dukumiintiga si loo helo qalabkooda. Hadda, qoysaska helaya Kombuyuutarka (Chromebook-ga) ayaa saxiixi doona foomka iyagoo si toos ah ugu saxiixaya Elektaroonig ahaan (E-Signature) oo loo marayo Xiriirka Waalidka (Parent Portal). Hoos waxaa ku xusan tilmaamaha sida loo dhammeystiro hawshan.


Talaabada 1-aad: Ku saxiix Xaruntaada Xiriirka Waalidka ee aan Xadka Lahayn (Infinite Campus Parent Portal)

Gal bogga xiriiriyaha (portal) adoo adeegsanaya xiriiriyaha Xiriirka Waalidka (Parent Portal link) ee bogga websaydka waalidka CCS website: www.ccsok.us. Haddii aadan soo xusuusan karin adeegsiga-magacaaga (username) iyo / ama eraygaaga sirta ah (password), oo aad ku qortay cinwaanka e-maylka intii lagu gudajiray sameynta, waxaad codsan kartaa in macluumaadka laguugu soo diro bogga (shaashadda) emaylka.



Talaabada 2-aad: Fur bogga furaha (tab-ka) Dukumiintiyada

Markuu xiriiriyuhu (albaabku) furmo, waxaa si otomaatig ah kaaga muuqan doona bogga dhexe ee "Xarunta Farriinta". Guji bogga furaha (tab-ka) "Dukumiintiyada". Haddii aadan arkin liiska bogga furaasha (tabs-ka) ee xiga dhinaca bidix ee shaashadda, dhagsii saddexda sadar (lines) ee kore ee ku xigta qoraalka ah (Infinite Campus) si aad u muujiso.




Talaabada 3-aad: Garo meesha laga qaybinayo Dukumiintiga Waalidka / Wakiilka ee Kombuyuutarka (Chromebook-ga) ee 20/21



Xiriirka Waalidka (Parent Portal Signing): Saxiixa Foomka Qaybinta ee Kombuyuutarka (Chromebook-ga) oo leh Saxiixa Elektarooniga ah (E-Signature)


Taariikhda: 31-ka Agoosto, 2020

Dukumiintiga ayaa muujin doona xaaladda "Feejignaanta Baahiyada" ("Needs Attention"). Si loo furo dukumiintiga oo loo raaciyo saxiixaaga, dhagsii falaarta yar ee ku xigta xaaladda.



Talaabada 4-aad: Dib u eeg dukumiintiga

Dukumiintiga ayaa ka furmaya shaashaddaada. Waxaad u rogi kartaa kor ama hoos si aad u aragto dukumiintiga oo buuxa. **Waxaa muhiim ah inaad si taxaddar leh u akhrido dukumiintiga si aad u hubiso inaad ku raacsan tahay dhammaan shuruudaha.**







Xiriirka Waalidka (Parent Portal Signing): Saxiixa Foomka Qaybinta ee Kombuyuutarka (Chromebook-ga) oo leh Saxiixa Elektarooniga ah (E-Signature)

Taariikhda: 31-ka Agoosto, 2020

Talaabada 5-aad: Ku soo lifaaq Saxiixaada Elektarooniga ah (E-Signature) oo Gudbi Dukumiintiga

Ka dib markaad dib u eegto dukumiintiga, u rogg xagga bogga ugu dambeeya oo guji astaanta muujineysa warqad iyo qalin-qoriga si aad ugu raaciso saxiixaaga. Afar-geeska (Sanduuqa) wada hadalka ayaa soo muuqan doona oo ku weydiinaya inaad ogoshahay 'Saxiixa' ama 'Diidad-mada'. Guji 'Saxiixa'. Saxiixaaga Elektarooniga ah (E-Signature) ayaa hadda ka soo muuqandoona dukumiintiga. Dhagsii batoonka 'gudbinta' ee dhanka hoose ee shaashadda (muraayadda).



Talaabada 6-aad: Dukumiintigaaga waa la gudbiyay

Ku noqo bogga furaha (tab-ka) ee Dukumiintiga Waalidka / Wakiilka ee Qaybinta Kombuyuutarka (Chromebook-ga) ee 20/21 oo hadda muujinaya xaalad 'Saxiix iyo Sugitaan'. Uma baahnid inaad wax kale qabato. Marka shaqaalaha dhismuhu ay ogolaadaan dukumiintigaaga, xaaladdu waxay isu beddeli doontaa mid 'Dhamaystiran'.

